

XIDHMADA BUUGAAGTA AH AFAF KALA DUWAN.

Albaaniya	Kaashmiri
Carabi	Litiwaaniya
Bengaali	Norwiijiyani
Shiine	Boolish
Kuruwaat	Boortaqiis
Jek	Bunjaabi
Dhaanish	Romaaniya
Dhaj	Ruush
Istooniya	Serbiyan
Faarsi	Islofaak
Faransiis	Isbaanish
Jarmal	Iswiidhish
Giriig	Telegu
Gujeraati	Turki
Hindi	Ukarayniyan
Hungari	Urdu
Talyaani	Fiyetnaam
Jabaan	Welsh

Intooda badan xidhmadaa buugaagta ah waxay yaalaan laybareeriga Dhexe. Waxa aanu soo diyaarin karnaa in buugga lagu keeno laybareeriga xaafaddaada.

Sida Loo Isticmaalo Laybareeriga -

Waxa aad u baahan tahay inaad ku soo biirtid Laybareeriga ka hor intaan lagu oggalaan inaad isticmaashid kombiyuutarada ama amaahatid buugaag. Ku-soo-biirista laybareerigu waa bilaash. Keen cadeynta adreeskaaga sida warqad, kaadh caafimaad, ama keen dukumenti ay leedahay Wasaaradda Guduhu (Home Office). Kaadhka waxa aad ku amaahan kartaa ilaa **12 shay** sida buugaag, CD-yo, fiidiyow iyo DVD-yo.

Waxa aad amaahan kartaa buugaagta saddex todobaad. Waxa muhiim ah inaad buugaagta ku soo celisid tariikhda ku shaambadeysan xagga hore ee buugga si dadka kale u akhrisan karaan. Haddii aad doonaysid inaad sii haysatid wakhti intaa ka dheer, iyada oo qof kale uu sii ballansaday mooyaane, waxa aad amaahda ku dhereysan kartaa telefoon, internetka, ama adiga oo taga mid ka mid ah laybareeriyada.

Habka ugu wacan ee aad shay ku heli kartid waa adiga oo ka eega NeLib, oo ah diiwaanka laybareeriga. Waxa aad diiwaanka gali kartaa adiga oo isticmaalaya kombiyuutarka laybareeriga ama internetka. Shaqaalaha laybareerigu si farxad leh ayay kuu tusi karaan sida loo isticmaalo haddii shaki kaaga jiro isticmaalkiisa.

Waxa laga yaabaa inay suurogal tahay in alaabta guriga loo geeyo macaamiisha aan guriga ka soo bixin karin sababo caafimaado daraadood.

Kharash iyo ganaaxyo ayay leeyihiin adeegyada qaarkood. Wixii ah faahfaahin buuxda ka eeg tasmada kharashka ee laga heli karo laybareeriga.

Somalian

Hordhaca

A deegyada Laybareeriga ee Nottingham

Laybareeriyadu waa meelo maaweelo leh oo aad ka heli kartid war, ka amaahan kartid buugaag, ka baran kartid afaf kana heli kartid gargaar. Waxa loogu talagalay in dadka oo dhami isticmaalo.

Gudaha laybareeriga waxa aad ka heli kartaa -

- o **Buugaag** - ah sheekooyin iyo run labadaba oo ku saabsan mawduucyo badan oo kala duwan; buugaag ku qoran afaf kala duwan oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo caruurta, oo ay ku jiraan buugaag ku qoran laba af; qaamuusyo 80 af. Haddii buugga aad doonaysid inaad akhridid aanad helin, fadlan gargaar weydiiso shaqaalaha.
- o **DVD-yo, fiidiyo iyo CD-yo** ah dhamaan noocyada muusigga oo ka yimi wadamo kala duwan, iyo tiro badan oo ah filimo, ah waxbarasho iyo maaweelo labadaba.
- o Isticmaalka **kombiyuutaro, Internet**, oo bilaash ah iyo tiro ah barnaamijyada kombiyuutarka.
- o Tiro ah **wargeyso iyo majalado**, ay ku jiraan kuwa wado kale.
- o **Alaab barasho af** ay ku jiraan buugaag, cajalado, CD-yo iyo CD-ROM-yo si lagaaga gargaaro barashada Ingiriisiga iyo afaf kale.
- o **War iyo gargaar** ku saabsan tiro badan oo ah mawduucyo ku saabsan hawlaha beesha, nolol-maalmeedka Nottingham iyo dhaxalkeeda.
- o **Xaflado dhaqan, bandhigyo, bandhigyo buugaag**, iyo **akhris sheekooyoyin** oo loogu talagalay caruurta.
- o **Laybareeri alaabta caruur-ciyaarsiiska**

Waxa aanu haynaa buugaagta barashada Xeerka Jidka iyo Wadista Baabuurka (**Highway Code and Driving Theory**) oo ah: Carabi, Bengaali, Shiine, Ingiriisi, Kurdi (Sorani), Bortaqiis, Bunjaabi, Turki, Urdu.

Awod isu yeel adiga oo war isticmaalaya

Laybareeriga gudihiisa waxa aad isticmaali kartaa **Internet bilaash** ah si:

- Aad u akhridid wargeysyada ka yimi wadamo badan
- Aad u heshid war cilmi-baadhis oo muhimad u leh codsigaaga magangalyada
- Aad u ogaatid war ku saabsan xuquuqdaada gargaarka
- Aad u eegtid warka ku saabsan bixinta hoy
- Aad xidhiidh ula yeelatid saaxiibada iyo qoyska adiga oo si bilaash ah u isticmaalaya iimayl

Iyo waliba dheeraad ...

Laybareeriyadu waxay hayaan waxqabad kala duwan oo loogu talagalay dadka Ingiriisiga baranaya. Wixii ah faahfaahin wac 0115 9152828.

Laybareeriyada Magaalada Nottingham

Central Library, Angel Row	9152828
Aspley Library, Nuthall Road	9155700
Bakersfield Library, Watson Avenue	9150199
Basford Library, Vernon Road	9155797
Bestwood Library, Arnold Road	9155799
Bilborough Library, Bracebridge Drive	9155795
Bulwell Library, Highbury Vale	9155708
Carlton Road Library, Carlton Road	9151399
Clifton Library, Southchurch Drive	9152945
Hyson Green, Gregory Boulevard	9152483
Meadows Library, Wilford Grove	9159279
Radford/Lenton Library, Lenton Boulevard	9151790
St Ann's Library, Robin Hood Chase	9156941
Sherwood Library, Spondon Street	9151155
Sneinton Library, Sneinton Boulevard	9151192
Strelley Road Library, Strelley Road	9155788
Top Valley Library, Top Valley Drive	9157504
Western Boulevard Library, Beechdale Road	9155749
Wilford Library, Ruddington Lane	9152950
Wollaton Library, Bramcote Lane	9155715

laybareeriyo – ah wadnaha beesha



Nottingham City Library and Information Service

Telefoon: 0115 9152828 Faakis: 0115 9152850

limayl: libraries@nottinghamcity.gov.uk

www.nottinghamcity.gov.uk/libraries



City of

NOTTINGHAM

Leisure and Community Services